

Catherine Duffett waxay leedahay khibrad macallimnimo oo gaareysa in ka badan labaatan sano oo ay ka shaqeysay Australia. Waxay ka soo shaqeysay iskuulo dowladeed iyo kuwo gaar loo leeyahay oo ku kala yaala Hobart, Darwin iyo Alice Springs waxayna wax u soo dhigtay dad meelo iyo dhaqammo kala duwan ka kala yimid. Waxay leedahay khibrad maktabad dugsiyeed oo toban sano ka badan waxayna hadda ka shaqeysaa maktabadaha dugsiyada hoose iyo kuwa sare labadaba. 2013 waxaa la guddoonsiiyey abaal marinta Macalinka Maktabadda ee Sanadka. Catherine waxay sidoo kale ardayda dugsiya sare usoo dhigtay Saynis iyo Xisaab. Waa bare akhrin oo khibrad sare leh. Catherine waxay si aan waqti buuxa ahayn samafal dadweyne ugala shaqeysaa NGO-yada waddammada soo koraya si kor loogu qaado waxbarashada carruurta aan daryeelka haysan. Magaca hawsheeda, ee Waxbarashada Mshauri). waxaa siiyey asxaabteeda reer Tanzaaniya isla markaana mshauri waa erey Sawaaxili oo macnaahiisu yahay la taliye. Barnaamijka waxaa la qoray iyadoo laga tashtay Yusuf Ali Salah oo ka soo jeeda Somalia. Wuxuuna in ka badan 15 sano ka soo shaqeeyey horumarinta bulshada ee waddammada Soomaaliya iyo Boqortooyada Ingiriiska. Yusuf wuxuu shahaado ka haystaa gargaarka degdegga ah ee caafimaadka maskaxda wuxuuna si mutadawacnimo leh ugu shaqeeyaa u doodidda amniga bulshada ee dugsiyada Soomaaliya halkaasoo macallimiinta ka taageero kobcinta wacnaanta carruurta.

Caafimaadka maskaxda iyo wacnaanta Carruurta iyo Dadka da'da yar: Hordhaca guud ee Wacnaantu wuxuu muhiim u yahay awood u siinta ardaydu inay si waafi ah wax u bartaan, xiriir mirodhal ahna la sameystaan kuwa kale, ugu dambeyna gaaraan awooddooda buuxda isla markaana bulshada si mirodhal ah gacan uga geystaan iyagoo dad waaweyn ah (Unicef Australia, 2026). La mucaamilidda maalmeed ee ardayda, macallimiintu waxay saameyn weyn ku leeyihiin wacnaanta ardayda. Barnaamijkanu wuxuu bixinyaa qaab daliil ah oo lagu taageerayo wacnaanta ardayda, isagoo bixinaya istaraatiijiyado 7 ah oo saameyntoodu sarreyso oo macallimiintu ay ku dhaqmi karaan si ay u juhdi mirodhal ah u geliyaan wacnaanta ardaydooda. Waxaa la garowsaday in macallimiinta ka shaqeeya waddammada soo koraya oo bara fasallo aad u waaweyn ay dhib ku noqoto meel marinta istaraatiijiyada. Si kastaba, waxaa la filayaa in macallimiinta hawalkan ay meel marin doonaan istaraatiijiyad suuragal ah si ay dugsiyada uga dhigaan meel raaxo leh oo ay ardaydu ku awoodaan inay wax ku bartaan illeen waxay dareemayaan in la qiimeynayo oo la taageerayo.

Waa maxay caafimaadka maskaxda iyo wacnaantu? Ururka Caafimaadka Adduunka (World Health Organization (2026)) wuxuu ku qeexaa caafimaadka maskaxdu inuu yahay xaalad wacnaan oo qofku ku garowsado awooddiisa, oo wax kaga qaban karo cadaadiisyada nolosha, si mirodhal ahna ugu shaqeyn karo, isla markaana uu awood u yeesho gacan ka geysashada bulshada. Caafimaad maskaxeed wanaagsan wuxuu lagama maarmaan u yahay wacnaanta guud.

Marka laga tixraaco Unicef, wacnaan waxaa loo arki karaa ilmo ama qof yar oo haysta wax kasta oo ay uga baahan yihiin nolol iyo inay gaaraan karti buuxda. Waxay isu wada keeneysaa dhammaan waxa uu ilmuhu nolosha uga baahan yahay. Inkastoo caafimaadka maskaxda iyo wacnaantu ay isku xiran yihiin, haddana wacnaanta ayaa ballaaran waxaana loola jeeda sida ugu wanaagsan ee aan dareeno marka laga hadlayo caafimaadkeenna maskaxda, jidhka, iyo

dareenka. Qeexitaanadaan waxay muujinayaan in wacnaantu ka baaxad weyn tahay caafimaadka maskaxda, laakiinse ay labaduba isa saameeyaan; caafimaad maskaxeed oo wanaagsan wuxuu gacan ku leeyahay dareemidda wacnaan (Trevail, 2025). Wacnaan waxaa loo kala qaybin karaa lix meelood oo isla xiriira oo ay ka mid yihiin: aqoonsi iyo dhaqan, dareenka in lagu qiimeeyey, in aad galangal u leedahay waxyaabaha baahida muhiimka u ah sida cunto iyo guri, ka qayb qaadashada go'aammada ku saameynaya, wax barid waafi ah iyo barasho, iyo caafimaad wanaagsan.

Macallimiintu iyagaa qalab u ah kobcinta wacnaanta ardayda

Iyadoo tirokoobkani uu sawir quus ah ka bixinayo xaaladda wacnaanta carruurta ee waddammada soo koraya, ayaa haddana la mucaamiliddooda ardayda, ay macallimiintu ku abuuri karaan dhaqan dugsi oo ay ardaydu dareemaan in la qiimeeyey oo ay ku bad qabaan. Dugsiyadu markaas waxay noqon karaan goob ardaydu ka helaan oo ay uga nastaan hagardaamada khibradaha noloshooda u gaarka ah. Barnaamijkaan wuxuu bixinayaa istaraatiijiyado heer sarreeya oo ay macallimiintu ku kaalmeysan karaan abuuridda jawi kobciya wacnaanta ardayda. Barnaamijku wuxuu ka koban yahay toddobo istaraatiijiyadood oo soo qoray Ururka Cilmi barista Waxbarashada ee Australia isagoo ka duulaya Shatiga Guud ee Hal Abuurka. Wax yar ayaa laga beddelay si ay si wanaagsan ugu cuntanto macallimiinta dugsiyada ilaha dhaqaale ku yar yihiin ee waddamada soo koraya ee la daalaa dhacaya fasallada waaweyn.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 1:

Xiriir la sameyso ardayda Macallimiinta wax ku oolka leh waxay ahmiyadeeyaan xiriir ay la sameystaan ardayda. Xiriirradaanu waxay door muhiim ah ka cayaaraan kor u qaadidda wacnaanta ardayda waxayna aasaas u yihiin waxbarid iyo barasho mirodhal ah.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 2:

Fududee xiriir u dhexeeya kuwa isku jaalka ah Macallimiinta wax ku oolka leh waxay fahmaan muhiimadda isku xirnaanta ardayda u dhexeysa waxayna fursad u siiyaan iney xiriirkaas dhisaan. Macallimiintu waxay kobcin karaan xiriir mirodhal ah iyagoo kor u qaadaya is oggolaan iyo ixtiraam u dhexeeya fasallada fursadna u siinaya waxbarasho la iska kaashado.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 3:

Askun oo ku soco waxa aad ka fileyso fasalku inuu qabto oo cad Macallimiinta wax ku oolka leh waxay askumaan, si cad u gaarsiiyaan si cadna ugu socdaan filashooyinka fasalka. Waxay ogyihiin in abuuridda filashooyinka iyo sharciyadu yihiin joogto, qaab ardayda lala wadaago

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 4:

Taageer isku soo dumid iyo isla jir Macallimiinta wax ku oolka leh waxay xiriiriyaan oo shaqo ka qabtaan siyaabo kor u qaadaya isku soo dumid bulsho iyo isla jir. Waxay garowsadaan ayna qiimeeyaan dhaqanka arday kasta u gaarka ah waxayna fahmaan in fasalkoodu leeyahay jawi dhaqan kala geddisan.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 5:

Kobci isku filnaan arday Macallimiinta wax ku oolka leh waxay filasho sarreysa u hayaan ardayda oo dhan waxayna ka caawiyaan iney horumariyaan isku filnaansho arday. Waxay ogyihiin in habka ardaydu ay u arkaan kartidooda, guul gaaridda iyo isku filnaantu uu saameyn ku leeyahay wacnaantooda iyo waxbarashooda.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 6:

Ardayda ka qayb geli Macallimiinta wax ku oolka leh waxay ardayda ka qayb geliyaan kuna dhiirigeliyaan soo xaadirid sarreysa. Waxay siiyaan khibrado macno leh waxayna ardayda u diraan hawlo xiiso leh iyo awood.

Istaraatiijiyada Wacnaanta Saameynteedu Sarreyso 7:

Kor u qaad istaraatiijiyoyinka ama Tabaha wax iskala tacaalidda iyo fududeynta isu dardaarmidda Macallimiinta wax ku oolka leh waxay kor u qaadi karaan tabo wax iskala tacaalid, oo ay ku jiraan iskaa isu maamulid iyo caawino raadsasho. Waxay ogaadaan isbedellada ardayga, waxayna si dareen wax uga weydiyaan isla markaana u fududeeyaan u diridda kooxda wacnaanta dugsigooda haddii loo baahdo

Wacnaanta carruurta waddamada soo koraya

Wacnaanta carruurta waddamada soo koraya waxaa ka jira walaac weyn, maadaama aan baahiyahooda ugu badan la daboolin. Carruur fara badan ayaa ku nool faqri, saameeya caafimaadkooda jidh ahaaneed. Badqabka carruurta waddamadaas lama hubo inta badan iska hor imaadyo hubeysan oo ka dhaca awgood, burbur dabiici ah iyo shaqaaqooyin kale (Patel et al., 2007). Ku noolaanshaha

waddooyinka, falalka caadooyinka dhibaataada leh sida gudniinka gabdhaha (United Nations Human Rights Council, 2016), ayaa la yimaada halistooda, saameyna ku yeesha wacnaanta kuwa xaaladahaas la soo gudboonaadaan.

Agoonta ayaa gaar ahaan u nugul maadaama ay halis sare ugu jiraan in aanba dugsii la geyn, uu ku dhaco HIV, la kulmaan cunto la'aan, uuna wel wel iyo caabuuq ku dhaco (Holborn and Eddy, 2011).

Wacnaanta gabdhaha waddamada soo koraya

Wacnaanta gabdhaha walaac gaar ayey leedahay. Sidoo kale wacnaanta carruurta naafada ah ayaa hooseysa. Gabdhaha Afrika ee naafada ah waxay dhibaato la kulmaan afar goor in ka badan kuwa awoodoodu u dhan tahay (ACPF, 2020). Iyadoo tirakoobkan halistiisu muuqato laga eegayo, ayaan lala yaabin in gabdhuhu halis aad u sarreysa ugu jiraan iney ku dhacdo dhibaatooyin caafimaad maskaxeed marka la barbar dhigo wiilasha. Nasiib daro, Afrika gudeheeda, is deldelka gabdhuhu kor ayuu u kacay. Qiyaastii 20% ee gabdhaha qaan gaarey waddanaka Muritaany 27% Siishalis, iyo 8% Gaana waxay isku dayeen iney is nafta iska gooyaan (ACPF, 2020).